

# BIYO KU DAR

## xirmadaada xaalada degdega ah



AH



AH



OO LOOGU  
TALAGALAY



[regionalh2o.org/emergency-preparedness](http://regionalh2o.org/emergency-preparedness)

# Kaydinta sahayda dhanka biyaha ee xaalada degdega ah waa mid sahlan

Sahaydaada dhanka biyaha ee xaalada degdega ah waxay ka koobnaan kartaa dhalooyinka biyaha ee aad ka soo gadato tukaanka, ama waxaad buuxin kartaa weelashaada gaarka ah. Haddii aad soo gadato dhalooyinka biyaha, waxaad xaqijisaa in aad ku hayso weelkii asalka ahaa oo aadan furin ilaa aad u baahato in aad isticmaasho.

Haddii aad isticmaasho weel kuu gaar ah, xaqiji in uu dabool adag leeyahay, isla markaana uu samaysan yahay weel cuntada loogu talagalay oo balaastik ama bir ah oo loogu talagalay in lagu hayo biyo, isla markaana si sax ah loo nadiifiyo ka hor inta aadan ka buuxin biyaha tuubada/qasabada.

## Nadiifinta weelkaaga

- 1 Iisticmaal saabuunta weelasha iyo biyo nadiif ah si aad u buuxda ugu dhaqdo weelkaaga iyo daboolkiisa.
- 2 Si fiican weelkaaga ugu dhaq biyo nadiif ah.
- 3 Hal qaado oo ah warankiilada/bilijita ka samaysan chlorine ee dareeraha ah guriga taala ee aan urta lahayn ku qas afar koob oo biyo ah.
- 4 Biyaha warankiilada/bilijita leh ku shub weelkaaga, bedel dabooka, isla markaana adkee.
- 5 Si xoog leh u rux weelkaaga muddo ilaa 30 daqiiqadood, adiga xaqijinaya in dhammaan meelaha dushhooda la daboolay.
- 6 Biyaha warankiilada/bilijita leh ka soo shub weelka isla markaana weelkaaga maran hawada ku qalaji.

## Buuxinta weelkaaga la nadiifiyay

- 1 Weelkaaga buuxi ilaa korka – ka taxadar in aadan gacantaada ku taaban halka laga furayo ama qasabadaha biyaha iyada oo laga yaabo in tani wasakheyso biyahaaga ama weelkaaga.
- 2 Talaabadii way kala duwan tahay iyada oo ku xiran hadba meesha biyahaagu ka yimaadaan:

<b>biyaha ka yimaado ceelka ama meel kale oo aan la daaweynин</b>	→ waaad u baahnaan doontaa in aad ku darto 1/8 oo warankiilo/bilij ah gallon-kiiba.
<b>biyaha ka yimaada shirkadaha biyaha laga bixiyo, sida magaalada</b>	→ uma baahnid in aad biyahaaga ku darto warankiilo/bilij sababto oo ah isla hadaba waa kuwo lu daaweyyay.
- 3 Dabooka dib u saar. ka taxadar in aadan taaban xagga hoose ama gudaha dabooka marka aad ku xirayso weelka, isla markaana xaqiji in uu si fiican ugu xiran yahay.
- 4 Calaamad iyo taariikh u yeel weelkaaga si aad u ogaan karto markii aad buuxisay.

Regional Water Providers Consortium waa urur wada shaqayneed iyo dhanka isku-duwida oo ka shaqeeyaa kor u qaadida qorsheynta iyo maamulida biyaha degmada ee magaalo weynta Portland, meelaha magaalada ah OR. Wax badan ka ogow waxyabaha ku saaban Ururka, xubnihiisa, iyo shaqadiisa dhanka u diyaargarowga xaalada degdega ah, ilaalinta biyaha, iyo isku-duwida gobolka adiga oo booqanaya [www.regionalth2o.org](http://www.regionalth2o.org).



**Kaydinta biyaha ee ay tahay in la sameeyo & ay tahay in aan la samayin**

**WAXAAD** dhalooyinka biyaha ka soo gadataa dukaanka ama isticmaal weelkaaga kuu gaarka ah si aad u kaydiso biyo

**WAXAAD** isticmaashaa weelasha cuntada loogu talagalay sida kuwa laga helo xerada fasaxa la aado 'camping' ama tukaamada bannaanka ku yaala ama dhalooyinka soodhaha ee labada litir ah

**HA** isticmaalin weelasha ka samaysan dhalada, caagaga wax lagu rido ee hore loogu isticmaaly caano ama cabitaan, ama weelashada loo isticmaaly kiimikada ama warankiilo/bilij

**WAXAAD** bedeshaa biyahaaga 6 bilood oo kasta (ma xumaanayaan, sidaa darteed haddii aad ugu baahato xaalad degdeg ah isla markaana biyuhu jiraan wax ka badan lix bilood markaa sii wad in aad isticmaasho)

**WAXAAD** kaydisaa biyaha ugu badan ee aad awoodo (haddii loo baahdu, ku bilow waxoogaa biyo ah waxaanad kordhisaa sahaydaada)

**WAXAAD** biyahaaga ku kaydisaa meel qabow, mugdi ah (haddii ay suurtagal tahay)